## Ma diidi kartaa in macluumaadkaaga inaad bixiso?

Waxaad xaq u leedahay inaad diido bixinta macluumaadkaaga. Si kastaba ha ahaatee, haddii aad doorato inaadan u sheegin shaqaalaha macluumaadkaaga shakhsiyeed ee ku khuseeya ama caafimaad waxaa laga yaabaa inay saameyso helitaankaaga daryeel kug haboon iyo daaweynba mustaqbalka.

## Keydinta iyo helid ogaanka macluumaadka

Macluumaadkaaga waxaa lagu heynayaa diiwaanka dhexe keydka ilkaha oo warqad ah, oo lagu keydinaya si ammaan ah goobaha DHSV. Macluumaadka qaarkii waxaa sidoo kale lagu keydiyaa nidaamka kumbiyuutarada oo laga yaabo inay isticmaalaan aqoon yahanada daryeelka caafimaadka ee jooga DHSV ee ku lug leh daryeelkaaga.

Xaaladii degdeg ah, waan bixineynaa macluumaakaaga caafimaad ee shakhsiyeed adiga kugu saabsan si uu kaaga caawiyo daryeelkaaga. Dhammaan xaaladaha kale, waxaa lagu weydiisanaya ogolaansho qoraal ka hor intaan macluumaadka la bixin.

## Sidee baad ku heli kartaa macluumaad dheer-aad ah oo ku saabsan arimaha gaarka ah?

Haddii aad wax saluugto ku saabsan sida DHSV ay kula dhaqmeen arimahaaga gaarka ah fadlan la xirriir Sarkaalka Arimaha gaarka ah ee DHSV marka ugu horeysa 03 9341 1000 si aad ugala hadasho waxaad saluugsan tahay.

Haddii aadan weli ku faraxsaneyn ama aad dooneysid inaad heshid macluumaad intaa ka badan oo ku saabsan sharciyada arimaha gaarka ah si aad u ilaaliso arimahaaga gaarka ah iyo macluumaadka caafimaadkaaga waxaad weci kartaa xafiiska Guddoomiyaha Adeegyada Caafimaadka 03 8601 5200 ama 1800 136 066 (wecitaan bilaash ah dadka meelaha baadiyaha ah ka soo wacaya) ama ku hel macluumaadkan adoo geliya website ka xafiiska ee ah www.health.vic.gov.au/hsc.

## Sidee baad u baran kartaa wax badan oo ku saabsan adeegyada ay bixiso DHSV?

**Gal www.dhsv.org.au**

**Kala xirriir khadka taleefanka macluumaadka Ilkaha ee Bulshada 1300 360 054**

**Xafiiska Maamulka DHSV**
GPO Box 1273L, Melbourne, 3001
The Royal Dental Hospital of Melbourne
720 Swanston Street, Carlton, 3053

**Caafimaadka Afku wuxuu keenaa caafimaadka fiican**

S/No. 73142, January 2009

# Ilaalinta arimahaaga gaarka ah



Adeegyada Caafimaadka Victoria waa wakaalada hogaamineysa adeegyada caafimaadka afka ee dadweynaha Gobolka, kor u qaadida caafimaadka afka, iibsiga adeegyada iyo siinta daryeel dadka Victoria.

dental health services victoria

# Ilaalinta arimahaaga gaarka ah

Adeegyada Caafimaadka Ilkaha ee Victoria (DHSV) waxaa la aasaasey 1996 inay noqoto wakaalada hogaamisa caafimaadka afka dadweynaha ee gobolka. DHSV waxay masuul u tahay Guddigeeda Agaasimayaasha ilaa iyo Wasiirka Caafimaadka Victoria.

Warqadan waxaa loo soo saarey inay kaa caawiso inaad fahamto xuquuqdaada iyo sababta macluumaadka adiga iyo/ama ku saabsan ilmahaaga loo ururinayo .

# Macluumaadkee baa lagaa qaadayaa?

Si laguu siiyo daryeelka suurtagalka ah ee ugu fiican iyo daaweyn, waxaa lagama maarmaan ah in DHSV inay kaa qaado macluumaadka shakhsiyeed iyo caafimaad ee ku khuseeya.

DHSV waxay qaadaa macluumaad sida magacaaga, cinwaankaaga, faahfaahinta sida laguula soo xirriiri karo, iyo sidoo kale macluumaadka ku saabsan xaaladaada caafimaadka afka ah iyo daaweynta aad qaadatay. Macluumaad ku saabsan caafimaadkaaga guud ayaa sidoo kale la qaadaa maadaama tani ay saameyn ku yeelan karto daaweynta aad helayso.

Macluumaadka caafimaadka waxaa loola jeedaa macluumaad ama fikrad ku saabsan:

- Caafimaadka shakhsiga ee jireed, maskaxeed ama nafsiyeed (ee wakhti kasta)
- Shakhsiga iintiisa ( wakhti kasta)
- Rabitaanka uu muujiyey shakhsigu ee ku saabsan adeega caafimaad ee loo qaban doono mustaqbalka
- Macluumaadka kale ee shakhsiyeed ee la qaaday si laguu siiyo adeeg caafimaad.

# Waa maxay sababta loo qaadayaa macluumaadka shakhsiyeed?

Waxaa la qaadaa macluumaadka shakhsiyeed iyo caafimaad waxaana lagu keydiyaa diiwaanka keydka oo loogu talagalay qorsheynta iyo qabashada daryeelka ilkaha. Macluumaadkan waxaa isugu keena DHSV aqoonyahanada daryeelka caafimaadka.

Keyda diiwaankaaga caafimaadku wuxuu ka kooban yahay macluumaad uu ku jiro magacaaga iyo cinwaankaaga, taleefan lambarkaaga iyo macluumaadka kale  sida sababta aad u raadineysid daryeel iyo talada daaweynta ee lagu siiyey.

Wakhti kasta oo adiga iyo ilmahaagu aad soo booqataan DHSV idinkoo doonaya daryeelka ilkaha, macluumaadkaaga waxaa lagu daraa diiwaanka keyda macluumaadkaaga. Waanu heynaa macluumaadkan, iyadoo oo uu la socdo faahfaahinta daryeelkii lagu siiyey, lacala haddii adiga ama ilmahaagu aad u soo noqotaan daaweyn dheeraad ah.

Mar marka qaarkood, diiwaanka ilkahaagu waa sida lagula xirriiro aqoon yahanada daryeelka caafimaadka ee DHSV ee wax ka geysta daryeelkaaga. Waxaa lagama maarmaan noo ah anaga inaan qaadno macluumaadkan oo aan heyno si aan u hubino in aqoon yahan kasta oo ku lug leh daryeelka caafimaadkaagu inuu heli karo dhammaan xaqiiqda. Taariikhdii hore ee daryeelka waxay naga caawin kartaa si dhakhsaha inaan garano daaweynta lagu siiyey waxayna noo ogolaaneysaa inaan wada shaqeyno oo faa'iido kuu leh adiga.

# Yaa macluumaadka loo sheegi karaa?

Inta lagu jiro iyo daryeelka DHSV ka diba, waxaa laga yaabaa inay lagama maarmaan noqoto inaad daryeel ka hesho aqoon yahano caafimaad oo kale. Sidaa darted, dhammaanteen waan wada shaqan karnaa, waxaana laga yaabaa inaan wadaagno macluumaadka lagaa qaaday.

Waxaan u gudbin karnaa macluumaadka adiga kugu saabsan  dadka daryeelkaaga sida tooska ah ugu lugta leh.

Waxaan raadsan doonaa inaan helno ogolaanshahaaga ka hor intaana cid kale u gudbin macluumaadkaaga shakhsiyeed ee adiga kugu saabsan.

# Yaa laga yaabaa inay isticmaalaan macluumaadkan?

**Wax barrida**

Macluumaadka qaarkii waxaa loo isticmaalaa in waxlagu baro oo lagu tababaro shaqaalaha, iyo in laga caawiyo la socodka iyo qorsheynta  mushtaqbalka adeega ilkaha. Meel alaale meeshii suurtogal ah, wixii macluumaad ah ee lagugu garan karo waa laga reebayaa ka hor intaan la isticmaalin.

**Cilmi baaris iyo baaritaanka hantidhawrka**

Macluumaadka waxaa loo diyaariyey inay helaan oo keliya mashruucyada cilmi baarista  ee uu ogolaatay Guddiga Anshaxa Cilmi baarista. Haddii cilmi baaristu ay ku lug leedahay adiga shakhsi ahaan, waa lagula soo xirriirayaa si loo helo ogolaanshahaaga. Waxaa laga yaabaa in loo baahdo macluumaad si loo caawiyo shaqaalaha inay dib u eegaan daryeelka la bixinayo si loo hubiyo inuu had iyo jeer yahay ka ugu tayada sareeya. Meer alaale meeshii suurtogal ah, macluumaadka lagugu garanayo waa laga reebayaa.

Qaar ka mid ah macluumaad ku saabsan booqashadaada isbitaalka  ayaa laga yaabaa in loo gudbiyo Wasaaradda Adeegyada Bani'aadamka (DHS) hantidhawrnimo awgeed. Macluumaadkan ayaa la soo koobaa kugumana garanayo macluumaadka waxaa loo isticmaalaa wixii ah maalgelinta, qorsheynta iyo hagaajinta tayada daryeelka caafimaadka.

**Waajibaadka sharciyeed**

Xaaladaha qaarkood, DHSV waxay ku khasban tahay sharci ahaan  inay bixiso macluumaadka shakhsiyeed ama macluumaadka caafimaadka, sida kiis tallaabo sharciyeed ah.